

Sidii aad uga codeyn laheyd boostada

Tuse akhriskiisu fudud yahay



Sidii aad u isticmaali lahayd tusahan




Golaha Doorashada Australia (AEC) ayaa qoray tusahan. Markaad aragtid erayga ‘anaga’ micnahiisu waa AEC.



Waxaan u qornay tusahan si sahan oo la akhrin karo.

Waxaan isticmaalnaa sawiro si aan ugu sharaxno fikradaha qaar.



Waxaan ku qornay erayada qaar qoraal madow.

Waxaan sharaxnaa micnaha erayadan. Liiska erayadaan waxeey ku yaalan bogga 31-naad.



Waxaad weydiisan kartaa caawimaad si aad u akhrisid tusahaan.

Saaxiib, xubin qoyska ah ama qof ku taageera ayaa laga yaabaa inuu ku caawiyo.

Maxaa ku jira tusahan?

Codeynta doorashada	4
Isu diiwaangelinta si aad u codeysid	6
Goormaad u baahan tahay inaad codeyso?	7
Ka waran hadii aadan codeen Karin maalinta doorashada?	8
Sidee baad u weydiisanaysaa ku codeynta boostada?	10
Goormaad helaysaa waraaqahaaga codeynta?	16
Maxaad ku sameynaysaa waraaqaha doorashada?	17
Sidee baad u buuxineysaa warqadaada doorashada ee cagaaran?	20
Sidee baad u buuxineysaa warqadaada doorashada ee cad?	22
Xagee baad dhigeynsaa waraaqahaaga cod bixinta?	26
Miyaad u baahan tahay inaad codsato ku codeynta boostada doorasho kasta?	27
Tababar masii sameen kartaa codeynta ka hor doorashada?	29
Sidee baad ku heli kartaa macluumaaad dheeraad ah?	30
Liiska erayada	31
Nagala soo xiriir	35


Codeynta doorashada



Australia gudaheeda waxaan leenahay doorashooyinka dawlada dhexe qiyaastii 3-dii sanaba.



Doorashada dawlada dhexe waxaa loogu talagalay dalka oo dhan.



Waa sidaan u doorano dawlada Australia.



Xeer ilaaliyaha Guud ayaa doorta taariikhda doorashada.

Maalinta doorashadu waxay noqoneysaa Sabti.



Maalintas, dadka Australian ka ahi way codeynayaan.

Markaad codeyso, waxaad ka caawineysaa doorashada qofka qayb ka noqonaya dawlada Australia.



Waa inaad codeysaa_haddii aad:

- Muwaadin australiyaan ah tahay oo
- aad jirto 18 sanno ama ka weyn.



Muwaadin waa qof la siiyey xuquuqda iyo xoriyada dalka meeshay ku nool yihiiin.




Codeeyntu waxay kuu ogolaanaysaa inaad wax ka go'aamiso cida maamuleysa dalkeena.

Isu diiwaangelinta si aad u codeysid



Ka hor intaadan codeyn, waa inaad **isdiwaangelisaa**.



Waxaad akhrin kartaa tusaheena oo kuu sheegaya sidii aad isu diiwaangelin lahayd – *Sidii aad isu diiwaangelin lahayd si aad u codeeyso*.

Goormaad u baahan tahay inaad codeyso?



Xeer ilaaliyaha Guud ayaa doorta taariikhda doorashada.



Waan u sheegi doonaa dadka taariikhda doorashada la qabanayo marka la go'aamiyo.



Hadii aad dooneysid inaad ogaatid maalinta doorashada la qabanayo, waad ogaan karta:

- booqo website keena www.aec.gov.au
- weydii xubin ka mid ah qoyskaaga, saaxiib ama deris.
- ka daawo warka TV-ga
- baar online
- Naga soo wac **13 23 26**.



Maalinta doorashada, codeentu waxay furantaa 8-da subaxnimo.



Maalinta doorashada, codeentu waxay xirantaa 6-da fiidnimo.



Waa inaad codeysaa ka hor intaysan xirmin codeentu.

Ka waran hadii aadan codeen Karin maalinta doorashada?



Mar marka qaar, dadku ma codeyn karaan maalinta doorashada.




Tan waxaa laga yaabaa inay sababtu tahay inay u baxayaan fasax.



Ama waxaa laga yaabaa inay isbitaal ku jiraan.



Hadii aadan codeen karin maalinta doorashada, waxaad codeen kartaa doorashada ka hor.



Waxaad noogu soo diri kartaa codeyntaada boostada.

Tan waxaa loogu yeeraa ku **codeynta boostada**.



Waa inaad dalbataa cod bixin boosto ah.



Waxaan ku sharxaynaa sida loogu codeeyo boosto bogga 20-naad.



Waxaad sidoo kale ka codeyn kartaa **goobaha codeynta** ka hor maalinta codeenta.



Goobta codeyntu waa dhisme, sida dugsi ama xarun bulsho, halkaas oo dadku ay aadaan si ay ugu codeeyaan inta doorashada lagu jiro.



Haddii aad na soo wacdid, waxaan kaa caawin doonaa helitaanka goobta codeynta ee kuu dhow.

13 23 26


Sidee baad u weydiisanaysaa ku codeynta boostada?



Waxaad ku weydiisanaysaa ku codeenta boostada adoo buuxinaya foom.

Kan waxaan ugu yeernaa codsiga ku codeynta boostada.

Waxaad buuxin kartaa codsigaaga ku codeynta boostada:



- online
- warqad.

Ku buuxinta codsigaaga ku codeynta boostada online.



Marka la go'aamiyo maalinta doorashada, booqo website keena.

www.aec.gov.au/pva



Waxaad u baahan doontaa inaad ka jawaabtid su'aalo yar.



Waxaan ku sharaxnay su'aalahan bogga 14-naad.



Waxaad weydiisan kartaa caawimaad si aad u buuxisid codsigaaga ku codeenta boostada ee online ka.

Submit

Markaad dhameyso, waxaad u baahan tahay inaad isticmaashid batoonka leh: Submit (Dir).

Buuxinta codsigaaga boostada ee ku codeynta warqadda



Waxaad ka heli kartaa foomka codsiga ku codeynta boostada xafiis kasta ee AEC.



Haddii aad na soo wacdid, waxaan kuugu soo diri karnaa foom boostada.

Lambarkeenu waa **13 23 26**



Waxaad u baahan doontaa inaad ka jawaabtid su'aalo yar oo foomka ku qoran.



Waxaan ku sharaxnay su'aalahan bogga 14-naad.



Waxaad weydiisan kartaa caawimaad si aad u buuxisid codsigaaga ku codeynta boostada ee warqad ka.



Markaad dhammeysid, waxaad u baahan tahay inaad foomka nagu soo celisid.

Waxaad sameen karta:



- Inaad noogu soo dirto boostada.

AEC

Reply Paid 9867

Magaala madaxda aad degan tahay


Uma baahnid inaad istaambo isticmaashid



- Gee xafiiska AEC

Hadii aad na soo wacdid, waxaan kaa caawin karnaa inaad heshid xafiiska AEC ee kuugu dhow.

13 23 26



- Iskaangaree oo ku soo rid website keena.

www.aec.gov.au/pva

Su'aalaha ku yaal foomka codsiga ee ku codeenta boostada



Hal su'aal waxay ku weydiin doontaa adreeskaga.



Waa inaad isticmaashaa adreeskii aad na siisay markii aad isu diiwaangelisay inaad codeyso.



Su'aal kale waxay ku weydiin doontaa meesha aad ku diri lahayd **waraaqahaaga codeynta**.

Waraaqaha codeenta waa foomam aad buuxineysid si aad u tustid cida aad dooneysid inaad u codeysid.



Waxaad na siin kartaa:

- adreeska aad ku nooshahay
- iyo adrees kale oo ah meesha dhamaan waraaqaha laguugu dirayo
- adrees kale oo aad ku booqaneysid
 - gobol kale
 - dal.



Waxaan sidoo kale ku weydiinaynaa su'aal sir ah.

Waa sida baaswaadh oo kale.



Waxaad sameen karta:

- dooro su'aashaada sirta ah
- qor jawaabtaada.



Waxaad u baahan tahay inaad xasuusnaatid jawaabtaada.



Waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad qoratid oo aad xafidid.

Goormaad helaysaa waraaqahaaga codeynta?




Waxaan kuu soo diri doonaa waraaqahaaga codeenta adiga marka ay noqoto wakhtigii la codeynayay




Waxeey kuugu imaanayan boostadada.

Waxaa lagu siin doonaa:



- 2 waraaqood oo aad ku codeeyso:
 - mid cad
 - mid cagaaran.



- bashqada ku codeynta boostada si aad ugu rido waraaqaha codeynta oo aad dib ugu soo dirtid.

Maxaad ku sameynaysaa waraaqaha doorashada?



Ka hor intaadan, codeyn waxaad u baahan tahay inaad heshid **markhaati**.



Markhaatigu waa qof ku yaqaan adiga, sida:

- Qof ka mid ah qoyskaaga
- saaxiib
- deris.




Markhaatigaaga waxaa loo baahan yahay inuu ku jiro diiwaanka doorashada.



Markhaatigaaga waxaa loo baahan yahay inuu hubiyo inaad buuxisay waraaqahaaga doorashada.



Tus waraaqahaaga doorashada iyo bashqada ku codeynta boostada markhaatiga ka hor intaadan buuxin.



Bashqada ku codeynta boostada waxaa lagu qoraya magacaaga iyo adreeskaaga.



Waxay sidoo kale ku weydiin doontaa su'aal sir ah.



Waxaad u baahan tahay inaad ku qortid isla jawaabtii su'aasha sirta ah ee aad ku bixisay codsigaaga.



Intaa ka dib, waxaad u baahan tahay:

- Ku saxiixdid magacaaga
ama
- samee calaamadaada.



Waxaad weydiin kartaa inuu ku caawiyoo
markhaatigaaga.



Markaad dhameysid, markhaatigaagu wuxuu u
baahan yahay inuu:

- saxiixo bashqada
- taariikhdana qoro.



Marka tan la sameeyo, waxaad diyaar u tahay inaad
codeeyso.

Sidee baad u buuxineysaa warqadaada doorashada ee cagaaran?



Warqadada codeenta ee cagaarka ah waxaa loogu talagalay

Aqalka Wakiilada.


Aqalka Wakiilada:



- Waa mid (1) ka mid ah labada (2) aqal ee Baarlamaanka Australia – guriga dawlada laga soo dhiso.



- Wuxuu ka kooban yahay 151 qof oo ay u codeeyeen dadka Australia.



Warqadaada doorashada cagaaran waxay leedahay:

- Iiiska magacyada musharaxyada
- sanaadiiq maran



Dooroo musharaxaa aad rabtid inaad u codeyso inta badan.

Ku qor 1 sanduuqa banaan ee ku xiga magacooda.


2

Dooro musharaxa aad rabtid inaad u codeyso ee ku xigga.


Ku qor 2 sanduuqa banaan ee ku xiga magacooda.



Sii wad doorashada musharaxiinta iyo qorida lambarada ilaa dhamaan sanduuqyada aad wada buuxisid.



Musharaxiinta qaarkood waxaa laga yaabaa inay leeyihii erayo ama sawiro ku xiga magacooda.



Sanduuq kastaa waa inuu lahaadaa lambar gaar ah.



Marka sanduuq kastaa buuxsamo, warqadaada doorashado waa eey dhamaatay.

Sidee baad u buuxineysaa warqadaada doorashada ee cad?



Warqadaada doorashada ee cad waxaa loogu talagalay aqalka sharci dejiyayaasha.

Aqalka sharci dejiyayaasha:



- Waa mid (1) ka kooban labada (2) aqal ee Baarlamaanka Australia – waxaa loo yaqaan aqalka sare
- waxaa ku jira 76 qof oo ay u codeeyeen dadka australiyaanka ahi si ay u metelaan mid kasta oo ka mid ah:
 - 6-da gobol
 - 2-da territory



Warqadaada doorashada ee cad waxay leedahay xariiq madoow.



Waxaa jira liiska kooxo ka koreeya xariiqda madoow.

Kooxaha badidoodu waa **xisbiyada siyaasada**.



Xisbiga siyaasadu waa koox ka kooban musharaxiin oo:

- wadaaga fikrado isku mid ah
- isku raaca sidii dawladu ay u maamuli laheed dalkeena.



Waxa jira liis musharaxiin ah ee ka hooseeya xariiqda madow.

Waxaa jira 2 siyaalood oo aad u buuxin kartid warqada doorashada ee cad:



- ku qor lambaro sanduuqyada ka koreeya xariiqda madoow oo u codee kooxaha.

ama



- ku qor lambaro sanduuqyada ka hooseeya xariiqda madoow oo u codee musharaxiinta.

U codeenta Khadka madoow korkiisa



Dooro kooxdaad rabtid inaad codkaaga ugu badnaan siisid.

Ku qor 1 sanduuqa banaan ee ku xiga magacooda.



Dooro kooxdaad xigta ee aad rabtid inaad codkaaga siisid.

Ku qor 2 sanduuqa banaan ee ku xiga magacooda.



Sii wado xulashadaada ku aadan kooxaha iyo ku qorida lambarada ilaa 6-da sanduuq buuxsamaan.

Waxaad ku joojin kartaa 6-da ama sii soco.

Ballot					
3	1	4	2	6	5

Hadii ay jiraan wax ka yar 6 sanduuq oo banaan, lambar ku qor sanduuq kasta.

Ballot					
			<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
<input type="checkbox"/>					

Qooxaha qaarkood waxaa laga yaabaa inay leeyihii erayo ama sawiro ku xiga magacooda.

Ku codeynta xariiqda madoow hoosteeda



1 =

Dooro musharaxa aad rabtid inaad u codeyso inta badan.

Ku qor 1 sanduuqa banaan ee ku xiga magacooda.



2 =

Dooro musharaxa aad rabtid inaad u codeyso ee ku xigga.

Ku qor 2 sanduuqa banaan ee ku xiga magacooda.



1 =
3 =
2 =


Sii wad xulashada musharaxiinta iyo qoritaanka lambarada ilaa 12-ka sanduuq ay buuxsamaan.

Waxaad ku joojin kartaa 12-ka sanduuq ama waad sii wadi kartaa.



Hadii ay jiraan wax ka yar 12 sanduuq oo bannaan, lambar ku qor sanduuq kasta.

Xagee baad dhigeynsaa waraaqahaaga cod bixinta?



Markaad buuxisid warqadahaaga doorashada, waxaad u baahan tahay inaad ku ridid bashqada ku codeenta boostada kabacdina aad xirtid.



Qaad bashqada ku codeynta boostada oo ku rid sanduuqa boostada.

Uma baahnid inaad istaambo isticmaashid



Tan samee isla markiiba si ay si dhakhsa ah noogu timaado.




Markaad gelisid bashqadaada sanduuqa boostada waxaad dhameysay codeyntii.


Miyaad u baahan tahay inaad codsato ku codeynta boostada doorasho kasta?




Waa inaad codsataa ku codeynta boostada doorasho kasta inta aan la gaarin.



Laakiinse waxaad codsan kartaa inaad noqotid boosto ku codeeye guud.



Boosto ku codeeye guud waxaa loogu soo diraa waraaqahiisa doorashada boostada doorashada dawlada dhexe mar kasta.



Tan micnaheedu waxaa weeye uma baahnid inaad mar kale soo codsatid doorashooyinka dawlada dhexe.



Waa inaad **xaq u leedahay** inaad noqotid boosto ku codeyyaha guud.

Hadii aad xaq u leedahay, waad soo buuxisay shuruudaheena



Tan micnaheedu waxaa weeye in laguu soo diri doono ku codeyn ta boostada doorasho kasta.



Waxaad ka heli kartaa macluumaa dheeraad ah aadna ka codsan kartaa website keena.

www.aec.gov.au/gpv

Tababar masii sameen kartaa codeynta ka hor doorashada?



Hadii aad dooneysid inaad isu sii diyaariso ood tababar usii sameyso codeenta, waxaad booqan kartaa website keena.

www.aec.gov.au/practice




Codkaaga tababarka ahi lama xisaabinayo.



Weli waxaad u baahan tahay inaad codeysid:

- goobta codeynta
- ama
- boosta ahaan

Sidee baad ku heli kartaa maclumaad dheeraad ah?



Hadii aad dooneysid inaad heshid xog dheeraad ah oo ku saabsan codeenta, waxaan haynaa laba tuse oo kale oo aad akhrin kartid:

- *Sidii aad isu diiwaanglin lahayd si aad u codeysid*
- *Sidii aad uga codeyn lahayd goobta codeynta.*




Waxaad ka heli kartaa tusayaashan website keena.

www.aec.gov.au/assistance



Waxaan sidoo kale idiinkugu heynaa maclumaad website keena dadka ku hadla luuqado aan ahayn Ingiriiska.

Liiska erayada



Waraaqaha doorashada

Waraaqaha codeynta waa foomam aad buuxineysid si aad u tustid ciddaad dooneysid inaad u codeysid.



Muwaadin


Muwaadin waa qof la siiyey xuquuqda iyo xoriyada dalka meeshay ku nool yihiin.



Shaqaalaha doorashada

Dadka ka shaqeeya goobaha doorashada maalinta doorashada.

Waa shaqadooda inay ku caawiyaan.



Diiwaanada doorashada

Liiska dhamaan cod bixiyeyaalka.



Xaq u leh

Hadii aad xaq u leedahay, waad soo buuxisay shuruudaheena



Isdiwaangeli


Markaad is diiwaangalisid, waxaan magacaaga ku dareynaa liiska cod bixiye yaalka.



Doorashada dawlada dhexe

Doorashada dawlada dhexe waxaa loogu talagalay dalka oo dhan.

Waa sidaan u doorano dawlada Australia.



Boosto ku codeyaha guud

Boosto ku codeeyaha guud

- waxaa loogu soo diraa waraaqahooda doorashada boostada marka la go'aamiyo taariikhda doorashada
- umana baahna in lasoo codsado mar kale doorashooyinka kale ee dawlada dhexe.

Xisbiga siyaasiga




Xisbiga siyaasadu waa koox ka kooban musharaxiin oo:

- wadaaga fikrado isku mid ah
- isku raaca sidii dawladu ay u maamuli laheed dalkeena.



Goobta doorashada

Goobta codeyntu waa dhisme, sida dugsi ama xarun bulsho, halkaas oo dadku ay aadaan si ay ugu codeeyaan inta doorashada lagu jiro.



Codbinta boostada ah

Noogu soo dir codbixintaada boostada.



Codee

Markaad codeyso, waxaad ka caawineysaa doorashada qofka qayb ka noqonaya dawlada Australia.




Cod bixiye yaalka

Dadka codeyn kara.



Markhaati

Markhaatigu waa qof ku yaqaan adiga, sida:



- Qof ka mid ah qoyskaaga
- saaxiib
- deris.

Markhaatigaaga waxaa loo baahan yahay inuu ku jiro diiwaanka doorashada.

Nagala soo xiriir

Adeega Tebinta Qaranka (NRS)



Isticmaalayaasha TTY:

- Wac 13 36 77
- Weydiiso 13 23 26



Hadal oo dhageyso isticmaalayaasha:

- Wac 1300 555 727
- Weydiiso 13 23 26



Isticmaalayaasha tebinta interneetka:

- Ku xir NRS
- Weydiiso 13 23 26



Luuqadaha kale:

- Wac 1300 720 153



www.aec.gov.au



[/AusElectoralCom/](https://www.facebook.com/AusElectoralCom/)



[@AusElectoralCom](https://twitter.com/AusElectoralCom)



[@auselectoralcom](https://www.instagram.com/auselectoralcom)



Kooxda Isticmaalka Maclumaadka waxay daabaceen tusahan sida sahlan loo akhrin karo iyagoo isticmaalaya muuqaalo sawiro u gaar ah. Muuqaalada waxaa laga yaabaa inaan dib loo isticmaali ogolaansho la'aan. Wixii weydiimo ah oo ku saabsan, muuqaalada, fadlan booqo. www.informationaccessgroup.com. Markhaati

Waxaa Idmay Ku xigeenka Guddoomiyaha Doorashada, Canberra.